

U-qalmitaanka

Sideen u codsadaa in aan noqdo macmiilka DDA?

- Buuxi foomamka iyo dokumentiyada loo baahan yahay. Waxaad ka soo-dejisan kartaa foomamka DSHS oo ku luuqadda aad doorbidayso ku qoran [halkan](#). Waxaad codsan kartaa xirmo adiga oo buuxinaya [Codsiga Adeegga iyo Macluumaadka](#) ama adiga oo soo celinaya macluumaadka hoos lagu xusay:
 - [Codsiga loogu talagalay Go'aaminta U-qalmitaanka DDA \(14-151\)](#)
 - [Oggolaanshaha \(14-012\)](#)
 - [Ogeysiiska Hab-dhaqannada Astursnaanta ee loogu talagalay Macluumaadka Sirta ah ee Macmiilka \(03-387\)](#)
 - [Diiwaangelinta Codbixiyaha](#) Gobolka Washington ee loogu talagalay codsabayaasha jira 18 sano ama ka weyn
 - Dokumentiyada taageera in aad leedahay naafonimo koriin, sida lagu qeexay [Foomka DSHS 14-459 Shuruudaha U-qalma ee Gaarka ku ah Da'da iyo Nooca Caddeynta](#) sida:
 - Diiwaanno waxbarasho
 - Diiwaanno nafsani
 - Diiwaanno caafimaad
- Noo soo sheeg haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta foomamka iyo meel ku sheegidda dokumentiyada.
 - La soo xirii [xafiiskaaga DDA ee degaanka](#) ama xafiis goboleedka ugu weyn ee hoos lagu xusay:

Degmada Degenaanshaha	Teleefoonka
Adams, Asotin, Benton, Chelan, Columbia, Douglas, Ferry, Franklin, Garfield, Grant, Kittitas, Klickitat, Lincoln, Okanogan, Pend Oreille, Spokane, Stevens, Walla Walla, Whitman, Yakima	(800) 462-0624
Island, King, San Juan, Skagit, Snohomish, Whatcom	(800) 788-2053
Clallam, Clark, Cowlitz, Grays Harbor, Jefferson, Kitsap, Lewis, Mason, Pacific, Pierce, Skamania, Thurston, Wahkiakum	(800) 248-0949

Maxay tahay sababta aan u codsanayo DDA?

- DDA waxay leedahay [adeegyo iyo barnaamijyo](#) badan oo kala duwan kuwaas oo ay ka mid yihiin daryeel shakhsi, goob ku-meelgaar ahaan loogu xannaaneeyo bukaannada iyo waayeellada, shaqaaleyn, taageero degaan, iyo kuwo kale oo badan.
- In macmiil la noqdo waqti hore oo nolosha ah ayaa kugu caawinaysa in aad marxalado kala-guur ah marto inta lagu guda jiro marxaladaha kala duwan ee nolosha.
- Haddii daryeelahaaga uusan awoodin in uu taageero ku siiyo mustaqbalka, mar hore ayaad macmiil noqon doontaa sidaa daraadeedna hannaanka ayaa noqon doonna mid fudud oo degdeg ah.
- Macaamiisha DDA qaarkood ma laha adeegyo lacag la bixiyo balse waxay weli helayaan kuwan soo socda:
 - [Warsidaha](#) Wargelinta Qoysaska
 - Helidda [Maaliyadda Sanduuqa Amaanada Deeqda ee Nafonimada Koritaanka](#)

- Baaritaan Jireed oo Sannadle ah iyo adeegyada caafimaadka ilkaha oo dheeraad ah oo loo marayo [Apple Health](#)
- Ujuurooyin la yareeyay oo loo marayo [Waaxda Duurjoogta iyo Kalluunka ee Washington](#)
- Waraaqaha oggolaanshaha oo qiimahooda la dhimay [Beeraha Gobolka Washington](#)
- Ikhtiyaaro guryayn [la awoodi karo oo dheeraad ah](#)

U-qalmitaankeyga DDA ma yahay mid dhici doonna ama ma u baahan doonna dib-u-eegis?

Haa, waa laga yaabaa. Waxaan kuu soo diri doonnaa ogeysiisyo xusuusin ah haddii u-qalmitaankaaga uu ku dhawaado in uu dhaco ama in dib-u-eegis lagu sameeyo. Haddii aad su'aalo qabto fadlan nala soo xiriir.

Waa maxay naafonimada koritaanka ee Gobolka Washington?

[RCW 71A.10.020\(5\)](#) ayaa ku qeexaya naafonimada koriinka in ay tahay Naafonimada Caqliga, Maskax Suux, Qallal, Ootisim ama xannuun kale oo neerfaha ku dhaca ama xaalad kale oo la mid ah Naafonimada Caqliga.

Naafonimadu waa in ay:

- Soo bilaabataa ka hor inta aadan siddeed-iyo-toban gaarin,
- Socotay ama la filayo in ay u sii socoto si aan xad lahayn, iyo
- Keenayso xaddidaadyo baaxad leh

Halkeen ka heli karaa xeerarka u-qalmitaanka?

Shuruudaha go'aaminta u-qalmitaanka waxay ku jiraan [Cutubka 388-823 WAC](#).

Miyaan dib-u-codsan karaa haddii aanan u-qalmin?

Haa. Dib ayaad u codsan kartaa haddii:

- U-qalmitaankaaga uu dhacayo maalin dhalashadaada ee xigta;
- Aad horey ugu qalantey balse u-qalmitaankaagu uu dhacay;
- U-qalmitaankaaga la joojiyay iyada oo sabab u ah in aadan hadda degganayn Gobolka Washington; ama
- Horey laguugu aqoonsaday in aadan u-qalmin, balse aad haysato macluumaad cusub.

Sideen u codsadaa adeegyada DDA?

- Haddii **aadan** horey u ahayn macmiilka DDA, buuxi oo keen foomamka iyo dokumentiyada loo baahan yahay.
- Haddii aad tahay macmiilka DDA, oo aadanna haysan Maareeyaha Kheyraadka Kiiska, buuxi [Codsiga Gudbinta iyo Macluumaadka](#) ama na soo wac.
- Waxaa laga yaabaa in aadan u baahnayn in aad noqoto macmiilka DDA si aad u hesho adeegga aad u baahan tahay.



- Loogu talagalay carruurta – DDA waxay bixisaa daryeel shakhsi oo loo marayo Dookha Koowaad ee Bulshada (Community First Choice) ee loogu talagalay carruurta haddii ay macaamiisha DDA yihiin iyo haddii kale. Xitaa haddii aadan lahayn naafonimada koritaanka, waxaad u-qalmi kartaa daryeelka shakhsi.
- Loogu talagalay dadka waaweyn – Dadka waaweyn ee u baahan daryeel shakhsi balse aan ahayn macaamiisha DDA ayaa heli kara adeeggan iyada oo loo marayo [Maamulka Gabowga iyo Taageerada Muddada Dheer](#).